BAYAANKA YOOLKA

Yoolka Halbert and Nancy Robinson Center for Young Scholars (RC) ee University of Washington waa saddex shay: waxbaris, daraasad, iyo adeeg. RC waa hormoodka umadda xagga soosaarista barnaamijyada u shaqeeya dhallinyarta hibada sare inta ayna gaadhin kuuliyadda iyo kuwa kuuliyadda ku jira. Waxaa naga go'an inaanu kor u qaadno helitaanka iyo hormarka ardayda waxay qabsan karaan mustaqbalka ardaydaas oo ka tirsan taariikhda ahaan bulshooyinka aan fursado badan hore u heli jirin iyo kuwa laga reebey fursadaha waxbarasho ee sare.

Iyadoo oo loo marayo barnaamijyada gelitaanka hore, waxaanu u diyaarinaa ardayda yaryar kuuliyadda oo waxaanu siinaa fursado waxbarasho oo adag oo la dedejiyey iyagoo ku dhex sugan bulsho wax ku ool ah oo garaad sarraysa. Waxaanu bixinaa barnaamijyo xoojin, hormar xirfadeed, onlayn ah, xagaaga iyo Sabtiyada. Robinson Center waa goob daraasadeed oo lagu barto nidaamka ugu wanaagsan, oo lagu joogteeyo halka ay joogto UW ee ah xarunta adduunka oo dhan laga yaqaan ee waxbarashada dadka hibada leh.

WIXII MACLUUMAD DHEERAADA AH

University of Washington
Guggenheim Annex, Box 351630
Seattle, WA 98195
206.543.4160
rcys@uw.edu

ROBINSON CENTER FOR YOUNG SCHOLARS
UNIVERSITY of WASHINGTON

BARNAAMIJYADA XARUNTA ROBINSON

GELITAANKA HORE EE KUULIYADDA

Xoojin

KOORSOOYIN ONLAYN AH

BARNAAMIJYADA XOOJINTA IYO ONLAYNKA AH

BARNAAMIJYADA XAGAAGA

Summer Challenge (**Loolanka Xagaaga)** (Fasalada 5-6)
Ardayda ku jirta Summer Challenge waxay u baadhaan nuxurka ka danbeeya qaab hawlo isdhexgal iyo wax gacanta laga qabto ah. Macallimiintu waxay ardayda ku dhiirigelisaa inay wax ku bartaan iyagoo baadhaya waxyaabaha jira ee lagu xalliyo mushkiladaha. Fasalada waxaa loogu talogalay in lagu dhiirigeliyo dhigasho qoto dheer oo mawduuca iyo wada shaqaynta lodka ah.

Summer Stretch (**Muddada Xagaaga)** (Fasalada 7-11)
Koorsooyinka Summer Stretch waxay ardayda u saamaxaan inay baadhaan aag mawduuc gaar ah, inay ka jawaabaan rabitaan khibradda hore ee kuuliyadda ee loolanka leh, inay helaan taageero ay hore ugu sii soconayaan koorsada lagu qoray, ama inay meel u sameeyaan koorsooyinka ikhtiyaarka ah iyo hawlaha ay sidoo kale ay iska dhaafi lahaayeen barnaamijyada dugsiga sare. Ardaydu waxay heleyaan shaybaadhada daraasadda iyo xarumaha ku yaala Jaamacadda Washington.

BARNAAMIJKA HORMARINTA ARDAYDA EE SABTIDA

Saturday Program waxaa loogu talogalay in la siiyo ardayda yaryar khibrad waxbarasho oo firfircoon, adag oo soo jiidasho leh . Koorsooyinka xisaabta, sayniska, qoraalka iyo falsafadda ayaa la siiyaa ardayda fasalada K-8. Dhammaan koorsooyinkayagu waxay ardayda geeyaan heer manhajka ka baxsan oo ay u baadhayaan aagga mawduuca ay doorteen qaab madadaalo iyo la falgal deegaanka waxbarashada ah. Ardayda waxaa la siiyaa fursado ay khatar dusha ugu ridan karaan, oo ay la iman karaan qaab ikhtiraac iyo dhallinyarnimo ku jirto oo ay wax ku bartaan. Fasaladayada waxa aanu diiradda ku saarnaa wada shaqaynta iyo in fikirada lala wadaago lodka. Ma jiraan wax dhibco iyo imtixaano ah. Barayaasha Sabtidu waa barayaal khibrad leh oo xirfad u leh dariska ay bixinayaan. **Dhammaan ardayda qaadata qadada bilaashka ah ama ta qiimaha jabani waxay qaadan doonaan ka dhaafid dhammaystiran oo kharashka waxbarashada ah.**

BARNAAMIJKA ONLAYNKA XARUNTA ROBINSON

Robinson Center Online Program waa fursad waxbarasho oo la dedejiyey oo ay bixiyaan shaqaalaha Transition School, waxayna keenaan manhaj waxbarasho oo sarreeya oo kuuliyadda kahor ah madal onlayn ah oo ardayda dugsiga sare oo dhan ka gali karaan. Barnaamijku waxa uu siiyaa fasalo kala duwan oo uu loolan ku galiyaa ardayda dugsiga sare in ay xoojiyaan khibraddooda waxbarasho ee heerka kuuliyadeed ee mustaqbalka.

BARNAAMIJYADA GELITAANKA HORE EE KUULIYADDA

BARNAAMIJKA GELIDDA HORE EE DUGSIGA KALA-GUURKA

Early Entrance Program ee University of Washington waa barnaamij laba darajo ah, kaas oo ka bilaabma Transition School. Transition School (TS) waa barnaamij hal sano ah oo ah u diyaargarawga kuuliyadda ah, kaas oo lagu qaato Robinson Center for Young Scholars, kaas oo qaata tiro yar oo ah ardayda da'doodu kayar tahay 15 jir Dayr kasta. Ardayda si wax ku ool ah u dhammeesyta Transition School ee soo bandhigay inay diyaar u yihiin heerka shaqo ee kuuliyadda, waxay galaan Jaamacadda iyaga oo u dhigma kuwa si buuxda u qalinjabiyay, iyada oo maraya Early Entrance (EEP) sanadka xiga. Si ay u guulaysataan barnaamijkan waxbarasho ee la dedejiyey, ee muddada kooban, waa in dadka la soo xulayaa ay muujiyaan guul waxbarasho, habdhaqan aqoonyahan, iyo dhiiranaan shakhsi ahaaneed. Hawlgalkayagu waa in aanu bixino khibrad waxbarasho oo adag oo laga faa'idayo oo ay taageeraan shaqaale dadaal badan, hawlwadeeno talobixineed, iyo bulsho xooggan oo ah lod isku wada da' ah.

AKADAMIGA UW EE ARDAYDA YARYAR

UW Academy waa barnaamij tartankiisu adag yahay oo gelitaanka hore ee Jaamacadda Washington ah oo loogu talogalay ardayda dugsiga sare. Ardaydu waxay soo dalbanayaan UW Academy inta ay ku jiraan fasalka 10aad, haddii la aqbalona, waxay ka tagayaan dugsiga sare dhammaadka fasalka 10aad si ay u galaan sanadka kowaad ee Jaamacadda Washington. Arday UW ahaan, waxay xor u yihiin inay doortaan waxay ku hamminayaan iyo inay ka qaybgalaan dhammaan fursadaha ay Jaamacaddu bixinayso. Robinson Center waxay bixiyaan adeegyo taageero iyo talooyin waxbarasho si ay u buuxiyaan baahida ardayda yaryar ee ku jira jaamacadda.

KAALMO DHAQAALE AYAA LA HELI KARAA DHAMMAAN BARNAAMIJYADEENA